

## Isla-xisaabtanka ku aaddan caruurta iyo colaadaha hubaysan

### Qaab hormarineedka iskala-xisaabtanka tacadiyada waaweyn ee ka-dhanka-ah caruurta xiliyada dagaalada

#### Soo koobid

Qorshe-howleedka iskala-xisaabtanka caruurta xiliyada colaadaha waa hannaan wax-ku-ool ah oo looga gol leeyahay dardar galinta isla xisaabtanka ku aadan tacadiyada culus ee ka dhanka ah xeerarka caalamiga loona gaysto caruuraha xiliyada colaadaha *The Children in Armed Conflict Accountability Framework* (CAC accountability). Qaab-howleedkan, oo jawaab ka ah baahida weyn ee loo qabo ka hortagga iyo xaal-marinta tacadiyadaas, waa:

1. **Qeexitaan dhamaystiran** oo lagu fahmo qorshe-howleedka isla xisaabtanka CAC, kaas oo ku salaysan xeerarka caalamiga iyo kuwa qaran ee maxaliga ah, iyo doorarka iyo mas'uuliyadaha kala duwan ee hay'adaha dowlada iyo kuwa kale ee bulshada ;
2. **Qorshe-howleedkan** wuxu tilaabo-tilaabo u hagaya, qaabki si wax-ku-ool-ah loogu hormarin lahaa isla-xisaabtanka qorshe howleedka CAC.


Qorshe-howleedkan waa mid baaxad wayn leh kuma eka ama gobol gooni ah. Wuxuu xooga saaraya dadka iyadoo da' -doodu kayartahay 18 sano la kulmay tacadiyo ka dhan ah xeerarka caalamiga xiliyada lagu jiro xaalad dagaal, wuxuuna taabanaya dhamaan tacadiyada liddiga ku ah xeerarka caalamiga ee xuquuqda aadanaha, iyo danbiyada hoos imanaya laamaha kale ee caalamiga. Qorshe-howleedkan waxaa loogu talagalay siyaasad-dejiyayaasha iyo dadka ka howlgala qayba kala duwan ee ay ka mid yihiin (ilaalinta caruurta, xuquuqda aadanaha, cadaaladda, cadaaladda kumeelgaarka ah, nabadgalyada) kuwaaso ka shaqeeya heer deegaan, heer qaran, heer gobol, iyo mid caalami.

#### Qeexidda iyo qaab dhismeedka qorshaha isla xisaabtanka CAC :


Waxaa qorshaha isla-xisaabtan ee CAC loola jeeda ka hortagga iyo xal u raadinta tacadiyada ka dhanka ah xeerarka caalamiga ee loo gaysto caruurta xiliyada colaadaha. Waxaana qayb ka ah talaabooyin garsoor iyo kuwo kale. Talaabooyinkan waxa la qaadan kara marxaladaha kala duwan ee colaadda, waxaa laga qaadan karaa heerar-faragalin oo kala duwan. Qeexitaanka iyo qaab dhismeedka qorsha-howleedkan waxay ku salaysanyihiin shuruucda caalamiga iyo xeerarka qaran, iyo mas'uuliyada dhinacyada dowliga iyo kuwa rayidka ah. Qorshe howleedka isla xisaabtan ee CAC wuxuu ka koobanyahay afar qodobood oo isku xiran:

- **Xad gudubyada in masuuliyadooda la qaado**, la aruuriyo, la tifaftiro, ana baahiyo xogta ku saabsan dadka dambiyada gaysta.
- **In la xoojiyo lana dardargaliyo shuruucda**, iyado la adeegsanayo xayiraado, dacwooyin, iyo ciqaab sharciga waafaqsan, kuwaas loola beegsanayo dambiileyaasha.
- **In dib u habayn lagu sameeyo nidaamka jira**, iyado loo marayo wada hadal, horumarin, duruufaha jira oo lala qabsado, dhaqan galin, iyo baraarujin ku aaddan hay'adaha, shuruucda, siyaasada, iyo mabaadii'da<sup>4</sup>.
- **Awoodsiinta caruurta iyo bulshooyinkooda**, iyadoo laga qayb galinayo dadka ay tacadiya saameeyaan geedisocodka isla xisaabntka iyo go'amada kasoo baxa, lana hubiyo in ay helaan xal la taaban karo.

#### Jaantuska laad: Afarta qaybood ee isla-xisaabtanka CAC



**Jaantuska 2aad: Tasmada qaababka istiraatiijiga ah ee horumarineed ee loo maro isla-xisaabtanka CAC**



**Horumarinta qaababka istiraatiijiga ee lagu xaqiijin laha qorshaha isla xisaabtanka CAC:** Iyadoo laga amba qaadayo qeexitaanka iyo qaab dhismeedka horay ku xusan waxay shaxda hoos ku qoran qeexaysaa iyo caqabadaha hor yaala qorshaha isla-xisaabtanka CAC taasoo suurta galinaysa horumarinta iyo mudnaansiinta qorshahan. Waxay shaxdan adeegsanaysa tusaalooyin laga soo xigtay xaalado dagaal ilaa 9 gaaraya si loo sharaxo qorshe howleedka. Waxay shaxdu noqonaysaa laba qaybood:

<p><b>Qaybta 1aad:</b> Inaan fahanno bay'adda ku xeeran isla-xisaabtanka</p>	<p><b>Talaabada 1aad:</b> In la qiimeeyo arimaha saamaynta leh.</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In la qeexo arimaha saamaynta ku qorshaha isla-xisaabtan ee CAC.</li> <li>In loo kuur galo qodob kasta oo arimahaas kamidah sida uu yahay iyo saamaynta uu leeyahay.</li> </ul>
	<p><b>Talaabada 2aad:</b> In la qiimeeyo farsamooyinka isla xisaabtanka</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In la qeexo farsamooyinka isla xisaabtanka.</li> <li>In farsamooyinkan sida ay ushaqeeyaan iyo ka dhaxeeyo iyo heerarka shaqo ee kala loo</li> </ul>
<p><b>Qaybta 2aad:</b> In la qeexo qaababka suurtagalka ay tahay in loo howlgalo</p>	<p><b>Talaabada 3aad:</b> In la xaddido qaababka suurtagalka ah in loo howlgalo.</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dib-u-eegis in lagu sameeyo xogtii horay loo aruuriyay.</li> <li>In la qeexo fursadaha iyo caqabada taagan.</li> <li>In laga fikiro istiraatiijiyadaha lagu hanan karo soo baxa, lagagana baaqsan karo caqabada taagan.</li> <li>In loo adeegsado casharada laga cilmibaarisyadii hore iyo xaaladaha gaarka ah (iyo/ama) sidii fikrado halabuur le loo curin lahaa.</li> <li>In la qeexo qaababka loo mari karo horumarinta isla-xisaabtanka.</li> </ul>
	<p><b>Talaabada 4aad:</b> Qaababka suurtagalka ah in mudnaan la kala siiyo.</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In la xaddido khataraha jira, iyo qorshayaashi lagaga baaqsan lahaa.</li> <li>In laysla xaddido awoodda lagu hirgalin karo qaababkaas kala duwan.</li> <li>In laysla xaddido saamaynta ay ku yeelan karto arimo xaalada gaar ah ku salaysan dhaqan galinta qorshayaal howleedka.</li> <li>In la qeexo qaababka mudnaanta gaarka le.</li> <li>In qaababka mudnaanta leh loo sameeyo qorshe fulineed</li> </ul>

Qorshe howleedkan wuxu ogolaana in:

- **Garawsashada baahida degdega** ha ee loo qabo taabba-galinta iskala xisaabtanka tacadiyada ka-dhanka-ah caruurta xiliyada colaadaha, laga lana shaqeeyo madaxda sidii yoolkaas lagu gaari lahaa.
- **In lagu baraarugo baahida** ee loo qabo in la gaaro isla-xisaabtan khuseeya dambiyada lagula kaco xiliyada dagaalka ama CAC, lagana qaybgaliyo madaxda uu go'aanka ka go'o si yoolkaas loo gaaro.
- **In la horumariyo qaabab halabuur leh** si loo horumariyo qorshe howleedka isla-xisaabtanku tacadiyada caruurta ka dhanka ah xiliyada dagaalka, iyado lagu salaynayo u kuur galidda xaaladaha gaarka ah, farsamooyinka iyo qaababka loo mari karo, iyo xiriirka ka dhexeeya farsamooyinka isla xisaabtan ee kala duwan.
- **In la qaato go'aanno laga baaraan dagay** si loo hubiyo in dhaqaalaha xaddidan uu ku boxo hirgalinta tilaabooyin isla mira dhal ah, wax ku ool ah, xaqiijinna kara la taaban karo ku yeesha caruurta iyo bulshooyinkooda.
- **Kordhinta wada shaqaynta** ka dhaxaysa dhinacyada kala duwan ee ka shaqeey heerarka iyo qaybaha kala duwan ee xiriirka la leh qorsha howleedka isla xisaabtan ee CAC (sida; ilaalinta caruurta, cadaaladda, nabadgalyada, iyo wixii lamidah) iyadoo tusaale ahaan la samayn karo lafagurid iyo qorshayn wada jir ah.
- **In la qiimeeyo saamaynta uu qorshe howleedka isla xisaabtanku CAC leeyahay** lagana baaraandago meelaha mudah taakulada farsamo, dhaqaale, iyo wixii la mid ah.

---

### Shaqada hay'ada

Conflict Dynamics International waa hay'ad madaxbannaan, oon macaashdoon ahayn, loona aasaasay ka hortagga iyo xallinta colaadaha, iyo la tacaalidda dhibaatooyinka aadanaha kasoo gaaro dagaalada iyo masiibooyinka kale ee dunida ka dhaca.

©2018 Conflict Dynamics International. All Rights Reserved.



---

### Conflict Dynamics International

1035 Cambridge Street  
Suite 10A  
Cambridge, MA 02141  
USA

+1 617 661 1066 Phone  
+1 617 661 1686 Fax

info@cdint.org  
www.cdint.org  
www.cacaccountability.org